# Ogow Xuquuqdaada marka aad la macaamilayso ICE

The Office of the
Minnesota Attorney General
helping people afford their lives and live with dignity, safety, and respect

31-ka Janaayo, 2025, Hay'adda Socdaalka iyo Kastamka ee Maraykanka (ICE) waxay soo saartay qoraal (memo) ay ku sheegtay in goobihii hore loo tixgelin jiray goobo xasaasi ah oo aan la geli karin—sida goobaha cibaadada, isu-soobaxyada dadweynaha, iyo socod-bannaanbaxyada—aysan hadda mar dambe ka ilaalinayn fulinta tallaabooyinka socdaalka, oo ay ku jiraan xarigga la xiriira socdaalka. Ururro badan ayaa ka walaacsan warkan, waxayna hubin la' yihiin xuquuqda iyo waajibaadka ay leeyihiin haddii ICE ay timaaddo goobahan. Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud (Attorney General's Office) wuxuu diyaariyey Su'aalo iyo Jawaabo (FAQ) ujeeddo wacyigelin ah, si ururrada ku yaalla Minnesota—sida isbitaallada, xarumaha hoyga, iyo goobaha cibaadada—ay u sii wadaan bixinta deegaan ammaan ah oo soo-dhawayn leh dhammaan dadka ay u adeegaan. Xafiiskani hore ayuu u soo saaray tilmaamo la xiriira joogitaanka ICE ee dugsiyada. FAQ-gan ma aha talo sharci, ururradana waa inay la tashadaan qareenkooda gaarka ah haddii ay qabaan su'aalo sharci oo gaar ah oo ku saabsan xuquuqdooda iyo waajibaadkooda.

## Yaa Dhaqan-geliya Sharciyada Socdaalka?

Socdaalka lagu yimaado Maraykanka waxaa nidaamiya sharciyada federaalka, waxaana dhaqan-geliya Waaxda Amniga Gudaha ee Maraykanka (U.S. Department of Homeland Security-DHS).

DHS waxay dhaqan-gelisaa sharciyada socdaalka iyadoo ka hortagaysa gelitaanka sharci-darrada ah ee Maraykanka, isla markaana qabata oo dib ugu celisa dalalkooda dadka aan haysan oggolaansho ay Maraykanka ku joogaan. Mas'uuliyadda ugu weyn ee dhaqan-gelinta sharciyada socdaalka ee DHS waxay saaran tahay Hay'adda Ilaalinta Xuduudaha iyo Kastamka Maraykanka (U.S. Customs and Border Protection-CBP), Hay'adda Socdaalka iyo Kastamka Maraykanka (U.S. Immigration and Customs Enforcement – ICE), iyo Hay'adda Muwaadinnimada iyo Adeegyada Socdaalka Maraykanka (U.S. Citizenship and Immigration Services – USCIS). CBP waxay dhaqan-gelisaa sharciyada socdaalka meelaha xuduudaha ah ama ku dhow xuduudaha iyo dekedaha laga soo galo dalka. ICE waxay mas'uul ka tahay fulinta sharciyada gudaha dalka, iyo sidoo kale xarigga, haynta, iyo ka-saarista (dib-u-celinta) dadka. USCIS-na waxay ka shaqaysaa habaynta codsiyada iyo dalabyada la xiriira faa'iidooyinka socdaalka iyo muwaadinnimada. Meel kasta oo FAQ-gan lagu xuso ICE, waxaa sidoo kale lagu darayaa CBP.

## Sababtee ICE ama CBP u imaan karaan goob xasaasi ah?

Wakiillada ICE waxay iman karaan hay'ad ama ganacsi kasta sababo kala duwan oo la xiriira fulinta sharciyada socdaalka awgood, oo ay ka mid yihiin hubinta u hoggaansanaanta oggolaanshaha shaqada ee shaqaalaha (taas oo ah in la xaqiijiyo in hay'adda ay shaqaaleysiinayso oo keliya dad haysta oggolaansho sharci ah oo ay Maraykanka uga shaqeeyaan), iyo sidoo kale qabashada dadka aan sharci ahaan dalka ugu joogin.

FAQ-gan kama hadlaayo xuquuqda iyo waajibaadka hay'ad marka wakiillada ICE ay yimaadaan si ay u fuliyaan hawlo la xiriira hubinta oggolaanshaha shaqada ee shaqaalaha. Waxa uu si gaar ah uga hadlayaa oo keliya xaaladaha ay wakiillada ICE yimaadaan si ay u baaraan ama u qabtaan dad looga shakisan yahay inaysan sharci ahaan Maraykanka ugu joogin.

## Xaggee ayay ICE ama CBP geli karaan iyaga oo aan oggolaansho haysan?

Goobaha badankood ee adeegyo bixiya waxay leeyihiin meelo dadweyne ah (sida hool ama meesha sugitaanka ) iyo meelo aan dadweyne ahayn ama gaar loo leeyahay (sida xafiisyo gadaal ah, meelaha daryeelka bukaanka, ama qolalka nasashada ee shaqaalaha). Xeerar kala duwan ayaa khuseeya iyadoo ku xiran halka ay wakiillada ICE u socdaan. Guud ahaan, meel waxaa loo tixgeliyaa mid aan dadweyne ahayn haddii dadka ku sugan ay filayaan asturnaan, isla markaana aysan u furnayn dadweynaha. FICE waxay geli kartaa meelaha dadweynaha ah iyada oo aan oggolaansho ka haysan hay'adda, ujeeddooyin la xiriira fulinta sharciyada

socdaalka awgood. Tusaale ahaan, ICE badanaa uma baahna oggolaansho ama amar maxkamadeed si ay hawlo sharci-fulin ah uga qabato qol sugitaan isbitaal, goob cibaado oo kaniisad ah, ama qol akhris maktabad. ICE sidoo kale way geli kartaa meelaha aan dadweynaha ahayn haddii hay'addu bixiso oggolaansho. **Haddii hay'adda aysan oggolaansho siin gelitaanka meelaha aan dadweynaha ahayn, ICE ma geli karto meelahaas ilaa ay haysato amar maxkamadeed ama yeedhin sharci ah (subpoena) oo ay maxkamad soo saartay.**

Hay'adaha leh meelo dadweyne iyo kuwo gaar ah labadaba waxaa laga yaabaa inay faa'iido u arkaan in si cad loo calaamadiyo meelaha aan u furnayn dadweynaha, sida in albaabka qol nasasho shaqaale lagu dhajiyo calaamad oranaysa "gaar ah," isla markaana la hubiyo in gelitaanka meelahaas la xaddiday. Hay'adaha sidoo kale waa inay magacaabaan hal shaqaale oo gaar ah oo mas'uul ka ah la macaamilka ICE, shaqaalaha kalena waa inay wakiillada ICE u gudbiyaan qofkaas.

## Maxay ICE ama CBP ka samayn karaan meelaha dadweynaha ee hay'adaha?

Inta badan, ICE waxay ka fulin kartaa meelaha dadweynaha ee dhisme kasta hawl kasta oo sharci ahaan la oggol yahay. Tan waxa ka mid ah la hadalka macaamiisha hay'adda ee ku sugan meelaha dadweynaha, dhageysiga wada-hadallada laga maqli karo meelaha dadweynaha, iyo akhrinta macluumaadka si cad uga muuqda meelaha dadweynaha. Hay'aduhu waa inay hubiyaan in macluumaadka xasaasiga ah ee macaamiishooda aan lagu kaydin meel ay dadweynuhu arki karaan, isla markaana aan lagu wadaagin meel si fudud looga maqli karo meelaha dadweynaha ah.

## Waa maxay dukumeentiga ay ICE ama CBP u baahan yihiin si ay u galaan meel gaar ah una fuliyaan hawlo la xiriira fulinta sharciyada socdaalka?

Si ay ICE u gasho meel aan dadweyne ahayn iyada oo aan oggolaansho ka haysan hay'adda, waa inay haysataa amar maxkamadeed oo ay maxkamad soo saartay (oo sidoo kale loo yaqaan "amar garsoore") ama yeedhin sharci ah (subpoena) si ay u fuliso baaritaan ama hawl baaris. Amar maxkamadeed oo garsoore waa amar qoran oo rasmi ah oo siinaya wakiillada ICE oggolaansho ay qof ku xiraan, meel ku baaraan, ama dukumeenti ku qaadaan. Si uu amar noocaas ahi u noqdo mid ansax ah, amar garsooreedka waa inuu:

- saxiixay garsoore ka tirsan maxkamadda federaalka ee Maraykanka (U.S. District Court) ama maxkamad gobol;
- si cad u qeexayaa goobta la baarayo iyo/ama dadka ama alaabta la doonayo in la qabto ama la qaado; iyo
- leeyahay taariikh, waxaana la soo saaray 14 maalmood eela soo dhaafay.

ICE sidoo kale waxay soo saartaa foomam u gaar ah, kuwaas oo mararka qaarkood loo yaqaan "amarro maamul" (administrative warrants) ama "amarro ICE," kuwaas oo faraya wakiillada ICE inay xiraan qof magaciisa la sheegay sababo la xiriira ku xad-gudub lagu eedeeyay sharciyada socdaalka federaalka. A**marada noocan ah kama yimaadaan maxkamad, mana siinayaan ICE oggolaansho ay ku galaan meelaha aan dadweynaha ahayn iyaga oo aan oggolaansho haysan.** Amar maamul ah wuxuu yeelan karaa qoraallo ay ka mid yihiin "Department of Homeland Security" ama "Form I-200" ama "Form I-205." Hay'adaha waxay xaq u leeyihiin inay akhriyaan amarka, isla markaana hubiyaan in uu yahay amar maxkamadeed (judicial warrant) iyo in uu si cad u oggolaanayo wakiilka inuu galo meelaha gaar ah ujeeddooyin gaar ah awgood. Hab fudud oo lagu kala garto amar maamul ah iyo amar maxkamadeed waa in la eego qaybta kore ee dukumeentiga iyo qofka saxiixay. Qaybta kore ee amar maxkamadeed waxay ku qoran tahay erayga "court," waxaana saxiixa qof leh jagada "judge" (garsoore). Qaybta kore ee amar maamul ah waxay ku qoran tahay "Immigration and Customs Enforcement," mana saxiixayo garsoore, balse waxa saxiixa sarkaal ama mas'uul socdaal. Xusuusnow, amar maamul ah ma siinayo ICE awood ay ku gasho meel gaar ah iyada oo aan oggolaansho la siin. Qofna looma baahna inuu oggolaado in ICE ay gasho meelaha aan dadweynaha ahayn.

Haddii ICE ay haysato amar maamul ah (administrative warrant), markaas waxa ay u badan tahay inay wado hawl lagu xirayo qof looga shakisan yahay inuusan sharci ahaan dalka ugu joogin. Haddii hay'addu aysan oggolaan in wakiil ICE ah oo wata amar maamul ah uu galo meel gaar ah, ICE waa loo oggol yahay inay bannaanka ka sugto meelahaas gaarka ah (sida baarkin dadweyne) si ay qofka u qabato marka uu soo baxo.

## Meelaha ku yaalla xarun hoy (shelter) keebaa dadweyne ah, keebase gaar ah?

Hay'adaha bixiya hoyga dadka waxay leeyihiin meelo gaar ah, xitaa haddii xarunta hoygu u furan tahay dadweynaha ujeeddooyin gaar ah (sida bixinta cunto). Sida hay'adaha kale ama ganacsiyada, in meel ku taal xarun hoy ah loo arko mid dadweyne ama mid gaar ah waxay ku xiran tahay in qofku si macquul ah u filan karo asturnaan marka uu ku sugan yahay meeshaas gaarka ah. Guud ahaan, meelaha gaarka ah waxaa ka mid ah qolalka jiifka iyo meelaha lagu seexdo, xitaa haddii ay wada isticmaalaan in ka badan hal qof oo ka mid ah dadka hoyga ku jira. Tusaale ahaan, qof hoy ku jira oo la wadaaga meel seexasho oo ballaaran macaamiil kale weli wuxuu yeelan karaa filasho asturnaan, waxaana ICE looga baahan yahay amar maxkamadeed (judicial warrant) si ay u gasho meeshaas iyada oo aan oggolaansho la siin. Shaqaalaha hoyga iyo dadka deggen midna looma baahna inay oggolaadaan gelitaan aan amar maxkamadeed lahayn oo lagu sameeyo qol jiif ama meelaha lagu noolaado.

## Sidee ayay hay'adaha ula macaamilaan ICE ama CBP?

Shaqaalaha hay'adda waa inay degganaadaan marka ay la macaamilayaan wakiil ICE ama CBP ah. Haddii wakiil ICE ah uu codsado gelitaan meel gaar ah, shaqaalaha waa inuu diiwaangeliyaa magaca wakiilka, lambarka aqoonsigiisa (ID), iyo magaca hay'adda uu ka socdo, isla markaana weydiiyo haddii uu hayo amar maxkamadeed. Haddii uu hayo amar maxkamadeed, waa in la codsadaa nuqul ka mid ah, laguna tusaa qofka hay'adda u qaabilsan arrintan si loo go'aamiyo tallaabooyinka xiga. Shaqaalaha hay'adda waxay xaq u leeyihiin inay kormeeraan wakiillada si loo hubiyo inay u hoggaansamayaan amarka maxkamadeed, isla markaana ay ku ekaanayaan gelitaanka meelaha gaarka ah ee si cad loogu xusay amarka. Sidoo kale, waa la oggol yahay in shaqaalaha hay'addu sameeyaan duubis cod ama muuqaal ah oo ku saabsan wixii is-dhexgal ah ee lala yeesho ICE. Shaqaalaha waa inaysan carqaladayn hawlaha sharci ee wakiillada, balse sidoo kale looma baahna inay ka jawaabaan su'aalaha ama ay u sheegaan in qof gaar ah uu goobta ku sugan yahay iyo in kale. Bixinta macluumaad been ah wakiillada ICE waa sharci-darro, waxayna keeni kartaa ciqaab culus, oo ay ku jiraan dacwado dembiyeed.

Haddii ICE ay timaaddo hay'ad si ay qof u xiraan, qofkaas looma baahna inuu ka jawaabo su'aalo ku saabsan xaaladdiisa socdaalka, sida uu dalka ku soo galay, halka uu ku dhashay, ama macluumaad kale oo la xiriira arrintaas. Qofka sidoo kale wuu diidi karaa inuu saxiixo dukumeenti kasta ilaa uu helo fursad uu kula hadlo qareen. Inkastoo qofka la xirayo uu xaq u leeyahay inuu aamuso isla markaana uu la tashado qareen, ICE looma baahna inay sugaan in qareen lala soo xiriiro ka hor inta aan qofka la gelin hayn ama gacanta lagu dhigin.

## Ma diidi karaan hay'adaha inay u adeegaan dad kaliya sababo la xiriira xaaladdooda socdaalka?

Guud ahaan, waa jebin sharciyada gobolka iyo kuwa federaalka labadaba ah in qof lagu takooro ama looga diido adeeg kaliya xaaladdiisa socdaalka awgeed. Sida ku cad Wax-ka-beddelka Shanaad iyo Afar-iyo-tobnaad ee Dastuurka Maraykanka, dhammaan dadka ku sugan dalka—ma aha oo keliya muwaadiniinta Maraykanka—waxay leeyihiin xuquuqo la xiriira habraac caddaalad ah (due process) iyo ilaalin siman (equal protection). Intaa waxaa dheer, waaxyaha degdegga ah ee isbitaallada waxaa sharci ahaan looga baahan yahay inay bixiyaan baaritaan degdeg ah iyo adeegyo xasilin ah, iyada oo aan loo eegin xaaladda socdaalka ee bukaanka.

## Ma looga baahan yahay hay'adaha inay xaqiijiyaan xaaladda socdaalka ee macaamiishooda?

Guud ahaan, hay'adaha looma baahna inay weydiiyaan ama kaydiyaan macluumaad ku saabsan xaaladda socdaalka ee dadka ay u adeegaan. Hay'adda waxay codsan kartaa macluumaadka socdaalka haddii qofku doorto inuu codsado faa'iidooyin dowladeed oo gaar ah oo u baahan macluumaadkaas, sida caymiska caafimaadka ee ay dowladdu maalgeliso. Haddii hay'adda ururiso oo hayso macluumaad ku saabsan muwaadinnimada ama xaaladda socdaalka ee macaamiisheeda, waxaa laga yaabaa in looga baahdo inay macluumaadkaas siiso ICE haddii ay hesho amar maxkamadeed (judicial warrant) oo u oggolaanaya ururinta macluumaadka. Burburinta ama tirtiridda dukumeentiyada lagu sheegay amar maxkamadeed waxay keeni kartaa dacwado dembiyeed.

**Minnesota Attorney General's Office • 445 Minnesota Street, Suite 600, St. Paul, MN 55101**
Twin Cities Calling Area: (651) 296-3353 • Outside the Twin Cities: (800) 657-3787 • Minnesota Relay: (800) 627-3529
*www.ag.state.mn.us*